Haddii ay ku waydiiso shirkad caymis in aad qaadatay baadhidda firsiga, waa inaad ku wargalisaa in aad si iskaa ah u bixisay tijaabooyinka ujeedooyin xog-raadin ooy ku jirto xog-raadinta firsiga, balse wax xog ah aadan ka hayn natiijooyinka.

## Khatarta waxyeelo ee mashruuca

Mashruuca kuma jiro wax daawayn ah, baadhitaano khaas ah, ama wax ka badalid daryeelka caafimaad eed heshid. Sidaa darteed ka qayb-qaadashada mashruuca suurta gal ma ahan inuu keeno wax waxyeelo ah. Tijaabada dhiigga ee dheeriga ah ee lagaa qaado waxay keeni kartaa walaac in yar jira ama danqasho yar.

Xaaladaha aan horay loo arag taasood rumaysantahay in lagugu wax yeelay, ma jiraan habayn magdhaw khaas ah. Haddii wax lagu yeelay dayacaad qof darteed, hadaba waxaad qaadi kartaa talaabo sharci laakiin waa inaad lacag bixisid. Ayadoon tan la eegaynin, haddii aad rabtid inaad ka cabato, ama aad wax ka qabtid waxa ku saabsan arrin kasta oo ah qaabka laguula dhaqmay muddadii daraasaddan, nidaamka cabashooyinka NHS waa laguu heli. Mashruucan indho-indheeyay Gudiga Xg-raadinta Anshaxa si loo hubiyo in xuquuqda iyo badqabka la dhawray.

## Dhibaatooyinka, cabashooyinka iyo tanaasulidda mashruuca

Haddii aad qabtid wax walaac ah waxaa kala xidhiidhi kartaa kooxda daraasadda 01162583385, ama talo madax banaan waxaad la xidhiidhi kartaa Cisbitaalada Jaamacadda ee Xogta Bukaanka Leicester iyo Adeegga Xiriirka Shaqo lambarka 08081 788337.

Xor baad u tahay inaad ka tanaasusho mashruuca xog-raadinta wakhti kasta ayadoon waxba u dhimaynin daryeelka aad heshid ama xuquuqdaada sharci, ayadoo la wargalinayo maamulka Qaybta Xog-raadinta Caafimaadka Wadnaha NIHR ciwaanka lagu muujiyay dhabarka warqaddan ama ayadoo laga soo celinayo tanaasulaadda adiga.

Waxaad waydiin kartaa tijaabooyinka iyo macluumaadka aad sheegtay in la tuuro ama la ogolaado tijaabooyinka iyo macluumaadka aad horay ugu deeqday inay socoto si loo adeegsado balse aan lagu yeelan wax ka qayb-qaadasho ah.

## War galin

Tijaabooyinka tabarucaadkaaga, iyo ogolaanshaha in la isticmaalo macluumaadka waxay u fasixi doontaa xog-raadiyayaasha inay qaadaan xog-raadinta caafimaad ee muhiimka ah. Waxaan jeclaan lahayn inaan kugu wargalino waxa ku saabsan xog-raadinta ayadoo la marayo wargaysgayaga caadiga ah ee Qaybta Xog-raadinta Caafimaadka Wadnaha ee Leicester NIHR. Haddii aad doonaysid inaad hesho wargayska, fadlan kla soo xidhiidh maamulaha lambarka 0116 258 3385.

## Ururka iyo maal-galinta mashruuca

Mashruucan waxaa maraysa Qaybta Xog-raadinta Caafimaadka Wadnaha ee Leicester NIHR, taasoo ay maal-galiso Macadka Qaran ee Xog-raadinta Caafimaadka taasoo qayb ka ah Waaxda Caafimaadka. Qaybtu waxay iskaashi la leedahay Cisbitaalada Jaamacadda ee Leicester iyo Jaamacadda Leicester.

Gudiga Anshaxa Xog-raadinta Leicester – East Midlands ayaa eegay mashruucan waxayna ka bixiyeen fikrado wanaagsan, Gudiga Anshaxa Xog-baadhista waa gudiyo madax banaan kuwaas oo eega dhamaan mashruucyada xog-raadinta NHS si loo hubiyo in xuquuqdaada iyo badqabkaaga la ayiday oo khataraha si haboon loo maareeyay.

Maal-galinta mashruucan waxaa bixiyay Hay'adda Wadnaha Biritish iyo Macadka Qaranka ee Xog-raadinta Caafimaadka.

## Xog dheeri ah

Haddii aad jeclaan lahayd in laga wada hadlo xog kasta oo ku qoran warqadahan ama faafaahinta ka qayb-qaadashadaada, fadlan la xidhiidh:

Qaybta Xog-raadinta Caafimaadka Wadnaha
Waaxda Cilmiga Wadnaha, Kooxda Cilmiga Caafimaad
Cisbitaalka Glenfield, Groby Road.
Leicester. LE3 9QP. UK

Tel: 0116 258 3385
Iimayl: Genvasc@le.ac.uk
www.le.ac.uk/lcbru

**Waad ku mahadsantahat**
mar kale tixgalinta ka qayb-qaadashada mashruucan

University of Leicester
University Hospitals of Leicester NHS Trust
NHS Leicester City Clinical Commissioning Group
NHS West Leicestershire Clinical Commissioning Group

Qaybta4.0 12 Sibtembar 2013

Qaybta Xog-raadinta Caafimaadka Wadnaha ee Leicester

NHS National Institute for Health Research

# Daraasadda GENVASC iyo baadhista caafimaadkaaga NHS

## Ee Xog-raadinta Wadnaha

Xogta ka qayb-qaataha



**Daraasadda GENVASC: Firsiga iyo Barnaamijka Baadhidda Caafimaadka NHS**

**Waxaa lagugu casuumay inaad ka qayb-qaadato mashruuca xog-raadinta ee la dhaho GENVASC taasoo ay fuliso Qaybta Xog-raadinta Caafimaadka Wadnaha ee Leicester NIHR, oo joogta Cisbitaalka Glenfield.** Waraaqahanu waxay bixiyaan faafaahinta mashruuca. Waxaan jeclaan lahayn inaad fahanto sababta aan u samaynayno mashruuca, iyo ka qayb-qaadashad kugu lugu leh. Fadlan na waydii haddii ayna wax kuu cadayn warqaddan.

**La xidhiidh:**: Waydiimaha ku saabsan qoraalka waxaa lagu samayn karaa:

Leicester Cardiovascular Biomedical Research Unit,
Department of Cardiovascular Sciences,
University of Leicester, Glenfield Hospital,
Leicester, LE3 9QP, UK

Tel 0116 258 3385
Iimayl lcbru@le.ac.uk
www.le.ac.uk/bru

## Ujeedada mashruuca

Waxaad qaadanaysaa baadhidda caafimaad si loo baadho khatartaada koridda xanuunka wadnaha, sidaa darteed haddii aad u malaynayso inaad ku sugantahay khatar sare talaabooyin xakamayn ayaa la qaadi karaa. Khatarta waxaa lagu qiimeeyaa ayadoo laysku darayo xogta waxyaabaha taasoo ognahay fursadda ku dhicidda xanuunka wadanaha sida da'da, sinjiga, dhiig karka iyo heerka kalestaroolka iyo in aad sigaar cabto iyo/ama aad leedahay macaan. Marka qiimayntan diiradda la saarayo xakamaynta, waxaan ognahay inayna ahayn heer sare dadka qaarna kuwaas oo loo malaynayo inay ku suganyihiin khatar hoose ama dhexdhexaad ah ayuu ku sii kordhaa xanuunku. Tani sababtu waa waxaa jira waxyaabo kale oo sidoo kale saamaynaya khatarta xanuunka wadnaha. Waxaan ognahay in xanuunno badan oo wadanaha ah ugu dhacaan si noqnoqad badan qoysas dhawr ah, taasna firsigu sidoo kale waa cunsur muhiim ah khatarta. Tusaale ahaan, hordhaca cilmi waxaa lagu cadeeyay xoogaa kala duwanaansho firsi taasoo keenta khatarta xanuunka wadnaha ee daran iyo wadno qabadka. Shakhsi ahaan, saamaynta kala duwanaansho kasta way yartahay, laakiin haddii dad dhawr ah fuliyaan wax badan oo ka mid ah, waxay yeelan kartaa saamayn cad oo ku saabsan khatarta wadno xanuunkooda daran. Mashruucan, waxaan rabnaa inaan baadhno haddii lagau daray xogta firsiga waxay hormarin kartaa saadaalinta xanuunada wadnaha, sida xanuunka wadanaha ee daran. Ayadoo la qaadayo tijaabooyinka dhiigga haboon iyo macluumaadka ee koox dad badab ah xaadiraya baadhista caafimaadka wadnaha oo la arkayo midka ku dhacay xanuunka wadnaha ee daran iyo xanuunada kale ee wadnaha waktiga, waxaan cadayn karnaa in lagy daro xogta firsi, ama xogta kale een ka heli karno tijaabooyinka dhiigga aad ku deeqday, waxaa si fiican loo cadayn lahaa dad la bardhigo nidaamyada jira. Haddii tani noqonayso arrinta, hadaba waxaa ku jira xogta qaar, mustaqbalka, noqnaysa shaksi wayn iyo faa'iido dadwayne.

## Ka qayb-qaadashada

Haddii aad ogoshahay inaad ka qayb-qaadato waxyaabaha soo socda ee dhici doona.

- Waxaa lagu waydiin doonaa inaad saxiixdo foomka ogolaanshaha.
- Tijaabo dhiig oo ah ilaa 20 ml (4 qaado) ayaa loo qaadan doonaa xog-raadinta. Xaaladaha badankood tan waxaa qaban dooan marka baadhitaanada dhiiga ee baadhidaada caafimaad. Waxaan sidoo kale kaa codsanaynaa ogolaanshaha in la jaydiyo dhiigga ka soo hadha tijaabada baadhista caafimaadkaaga.
- Waxaan ka qaadan doonaa xogaa xog ah diiwaanadaada caafimaad hadda.
- Mustaqbalka waxaan isticmaali karnaa diiwaanadaada caafimaad mar kale xogta cusub. Waxaan u samaynaynaa tan anagoo ku raadinayna lambarkaaga NHS.
- Arrinta la xidhiidha golaanshahaaga khaaska ah, waxaan kula soo xidhiidhi karnaa mar kale mastaqbalka, boosto ama iimayl, si laguugu casuumo inaad ka qayb-qaadato xog-raadin kale. Khasab kuguma aha inaad ogolaatid inaad sidaas samayso.

**Fadlan la soco** in ka qayb-qaadshada mashruucan uu gabi ahaanba yahay ikhtiyaar. Aday ku jirtaa inaad go'aansato inaad doonaysid inaad ka qayb-gasho. Go'aankaagu ma saamayn doono daryeelka, baadhitaanada ama daawaynta in aad ku heshid si uun.

Sidoo kale, inaad ogolaato marar badan in la tix-galiyo ka qayb-qaadashadaada, ma qaadi doono wax baadhitaano tijaabooyinka aad bixisay 30 cisho. Haddii muddada wakhtigan )ama si xidhiidh ah) aad u doonaysid inaad ka tanaasusho daraasadda waad samayn kartaa adigoo la xidhiidhaya Qaybta Xog-raadinta Caafimaadka wadnaha ee Leicester NIHR ama soo celinta foomka tanaasulidda eed bixisay.

## Qarsoodi iyo adeegsiga tijaabooyinka iyo macluumaadka

Ka qayb-qaadashadaada mashruucan wuxuu ahaan doon aaqarsoodi. Waxaa laguu samayn doonaa lambar daraasad oo gooni ah, kaasoo loo adeegsan doono in lagu habeeyo macluumaadkaaga iyo tijaabooyinka. Marka xog-baadhe kasta isticmaalo xogtaada ama tijaabadaada waxay kali ah ooy ogaan doonaan lambarkaaga daraasadda. Tani waxay ilaalin doontaa aqoonsashadaada.



Macluumaadkaaga waxaa lagu kaydin doonaa dhaata-bays xafidan ee Qaybta Xog-raadinta Caafimaadka Wadnaha ee Leicester NIHR.

Tijaabooyinkaaga waxaa lagu kaydin doonaa meelo xafidan ee Qaybta Xog-raadinta Caafimaad. Waxay u adeegsan doonaan mustaqbalka xog-raadinta wadnaha. Waxaan sixi doonnaa DNA daada ee qayb ka mid ah dhiigga aad u bixisay baadhidda firsiga. Shakiga ayaa lagaa saari karaa in wax qarsoodi cxog caafimaad oo ku saabsan aan la siidaynayn, la daabacaynin hab lagugu aqoonsan karo.

Shaqaalaha maaraynaya mashruuca waxay adeegsan doonaan lambarkaaga NHS si ay u helaan macluumaadka ee diiwaanadaada caafimaad (hadda iyo mustaqbalkaba) waxayna kugu casuumi inaad ka qayb gasho mustaqbalka mashruuca xog-raadinta (haddii aad ogolaatid in lagula soo xidhiidho).

Xog-raadinta waxaa laga yaabaa inay baadhaan oo dabagalaan Bixyayaasha Xog-raadinta ama maamulada UK si loo hubiyo in si haboon loo fuliyay. Baadhayaashu ama dabagalayaashu waxay heli karaan diiwaanadaada meesha la xidhiidha fullinta daraasadda.

## Faa'iidooyinka xog-raadinta

Ujeeddada xog-raadinta waa in la hormariyo saadaalinta xanuunada wadnaha. Ma siin doono shakhsiyaadka natiijooyinka xog-raadinta wareegyda. Tani waa sababta xidhiidhka caafimaad ee qaar ka mid ah natiijooyinka xog-raadinta ay qaadan karaan sannado dhawr si loo xaqiiqsado oo loo sharciyeeyo. Haddii xog-raadistanadu ayna badalin hawsha caafimaad, hadaba baadhis kasta ama daawayn ayaa la heli ayadoo la marayo NHS ka dib qiimayn wanaagsan.

Sidaa darteed faa'iidada shakhsi ahaan iyo toosba macquul kuuma ahan ka qayb galidda mashruuca laakiin xogta aan ka helno mashruucan waxay na caawin doontaa mustaqbalka si loo hormariyo daryeelka caafimaad ee dadka khatarta ugu jira xanuunada wadnaha.